



## XAFIISKA QARAMADDA MIDDOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIA (UNSOM)

### WAR SAXAAFADEED 15/2014

#### **Ergyagga Qaramadda Middobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya oo cambaareeyay dilka loo gaystay xubin Baarlamaanka ka tirsan iyo wariyaba**

**Muqdisho, 22 Abriil 2014** – Ergyagga Gaarka ah ee Qaramadda Middobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya, Nikolas Kay, ayaa cambaareeyay dilka loo gaystay Abdiasis Issaq Mural oo ka tirsanaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed. Marxuum Isaaq waxaa saaka aroortii hore lagu dilay Muqdisho, waxaana dilay dablax haan haybtooda la agaranaynin.

“Mursal waa mudanahii labaad ee lagu dilo Muqdisho in ka yar 48 saacadood gudahooda. Mudana kale oo la yiraahdo, Isaaq Maxamed Riino ayaa shaly la dilay. Labadda dilba waxaa sheegtay Al-shabab.

“Waxaan aad ooga xumaaday dilka Mudane Abdiasis Isaaq Mursal, Waxaana si adag u cambaaraynayaa dilkan. Waxaa kale oo i xanuunjiyay dil kale oo xalay loo gaystay Magaaladda Muqdisho wariye. Warbaahinta waa in loo ogolaadaa in ay howshooda u wataan si aan cabsi ku jirin”, ayuu yir SRSG Kay.

Dablax aan heebtooda lagaranaynin ayaa dilay wariye u shaqaynayay Raadiyaha Dalsan, Muxamed Xassan Amar, waxaana lagu dilay suuqa Bakaaraha fiidnimadii Isninnta.

“Waxaan ka walaacsanahy weerarka ka soo cusboonaaday beryahaan Muqdisho. Waxaa naga go’an in aan sii wadno taageeridda aan u hayno dadka Soomaaliyeed iyo wakiiladooduba maadaama ay oogu howljiraan xaqiijinta rabitaankooda iyo kan dadkooduba, taas oo ku aadan sidii ay ku gaari lahaayeen mustaqbal ay ku dheehantahay xasilooni iyo degenaasho”

“Dadka masuulka ka ah dilkan arxan la aaanta ah , mahayaa wax kale oo ay u siiyaan dadka Soomaaliyeed oo aan ka aheen in ay sii wadaan qaska iyo amaan daridda. Waxaan oogu baaqayaa Dowladda in ay si dhakhso leh u baarto weeraradan unha horkeento \maxkamad Dembiilayaash sidda oogu dhakhsi badan, ayuu yir Ergayggaa Gaarka ah.

Ergyagga Gaarka ah waxa uu tacsii tiiraanyo leh u dirayaa qoysaskii iyo saaxiibaddi Mursal iyo Amar, sidoo kalena waxa uu tacsii udirayaa baarlamaanka Soomaaliyeed, iyo bahdda warbaahinta Soomaaliyeed.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta Aleem Siddique  
Tel: +254 41 350 6603 • Email: [unsom-spokesperson@un.org](mailto:unsom-spokesperson@un.org)

Fadlan eeg rugta Internet-ka:  
[www.unsom.unmissions.org](http://www.unsom.unmissions.org)

 @UNSomalia  [facebook.com/UNSomalia](https://facebook.com/UNSomalia)